



do **1** thing

Himilada Do 1 Thing waa inay ku dhaqaajiso ashkhaasta, qoysaska, ganacsiyada iyo bulshadu inay u diyaargarobaan halisaha oo dhan ooy noqdaan qaar masiibada u adkaysta.

YOOLKA: Qorshee waxa la samaynayo hadday dhacdo xaalad gurmada ama masiibo.

Qorshe Samee

Masiibooyinku waxbay beddelaan. Marka xaalad gurmada dhacdo waxaad go'aansan kartaa waxa dhakhso loo samaynayo, inta aad ka walaacsan tahay waxa dhici kara. Haddaad hore u sii qorshayso, waxa fududaan doonta inaad qaadata go'aanka saxda ah marka waxa ugu xum dhaco.

Dooro mid kamida waxyaalahan soo socda si aad u samayso bishan si aad si fiican ugu diyaargarawdo:



Baro masiibooyinka ka dhici kara mandaqaddaada go'aansana waxaad qaban doonto masiibada.

Waxa muhiim ah inaad ogaato noocyada masiibooyinka ka dhici kara halka aad ku nooshahay. Gurigaagu ma wuxuu ku yaalaa daadmareen? Ma waxaad ku sugan tahay meel dhulgariiro leh? Tornaadooyinka ugu dhaw inay dhacaan maxay yihiin? Ogaanshaha masiibooyinka dhici kara waxay kaa caawin kartaa barashada sida loogu diyaargarobo iyo waxa la sameeyo. La xidhiidh Laanqayrta Cas ee Maraykanka deegaankaaga ama xafiiska maamulka xaaladda gurmada si aad wax badan uga ogaato masiibooyinka mandaqaddaada.

La kulan qoyskaaga. Kala xaajoo sida loogu diyaargarobayo xaaladaha gurmada ah ee ay u dhawdahay inay ka dhacaan halka aad ku nooshahay, wax ka barato, ka shaqayso, kuna ciyaarto. Caddee masuuliyadaha xubin kasta oo qoyska kamida oo qorshee inaad u wada shaqaysaan sida koox. Haddii xubin qoys milatariga kujirto, qorshee sida aad ugu jawaabi lahayd haddii la ciidan keeno.

Ka Hadalka Masiibooyinka

Ka sheekaynta masiibooyinku waxay noqon karaan cabsi, gaar ahaan carruurta, ama qof ay ku adkaan karto la qabsiga nololaha caadiga ah. Daacad ahaw oo tognow. Waxa aan la garanayn wuxuu inta badan keenaa walaac badan marka la barbardhigo waxa la garanayo. Dhagayso waxa qofku leeyahay, baro sida ay dareemayaan iyo waxa ay ka biqi karaan. Dadka da'da ah iyo kuwa naafada ah waxay ka warwari karaan in waydiisiga caawimo marka masiibada ay qaadi karto madaxbannaanidooda. Ka hadal ikhtiyaaro kala duwan ee kaalmo qoshana u samee.

Tallaabooyin qaad imika si aad uga hortagto waxyeelo soo gaadha gurigaaga xilliga masiibada.

Markaad ogaato dhibaataada ka dhacay bulshadaada, waxa jira waxyaalo aad samayn karto si aad u yarayso khatarta dhaawac ama waxyeelada hantiyeed. Waa kuwan soojeedimo.

Tornaado – Ku dar qolka badbaadada tornaadada gurigaaga, ama ku dar ilaalin dheeraad ah qol jiray si aad u ilaaliso badbaadada qoyskaaga xilliga tornaadada. Raadi daabacaadda FEMA 320 si aad macluumaad dheeraad ah u hesho.

Harikaan – Rakib shabaga haarikaanta. Gaagaabi geedaha ku ag yaal gurigaaga si aad uga hortagto waxyeelo ka timaad dhicistooda. Ammaan ka dhig sofitiskaaga si aad u xaqiijiso inay siin qaab ay dabaysha iyo biyuhu u soo galaan gurigaaga. Hubso in albaabada laga soo galayaa ay leeyihiin saddex hinjiye iyo quful.

Dab-duureedka – Isticmaal alaabta dhismaha ee dabka u adkaysata sida jilay iyo saydhing. Laamaha iyo dhirta dib u jar 30 fiit gurigaaga. Xaabadu waa inay ugu yaraan 30 fiit kuu jirtaa. Barnaamijka ka hubi Ururka Ilaalinta Dabka Qaranka macluumaad dheeraad ah.

Cuntada - Sare uga qaad gurigaaga heeka daadadka ama tallaabooyin qaad si daadku aanu kuusoo gaadhin. Sare uga qaad biyaha/laydhkaaga iwm heerka daadka. Hubso inaad leedahay dalool ku filan daadku inuu ka baxo. Isticmaal alaabta dhismaha daadka u adkaysata markaad dhisayso ama dib u qaabaynayso. Qaadista tallaabooyinka sida kuwan waxay hoos u dhigi kartaa heerarka caymiska daadka.

Dhulgariirka – Badbaadi farnijarkaaga, qalabka korontada ku shaqeeya, iyo biyo kululeeyaha gidaarka ku tiirsan ama dhulka yaala. Rakib qabtayaal kabadhada iyo albaabada kabadhada. Hubso in qalabkaaga korontada ku shaqeeyaa ay ku xidhiidhsan yihiin xidhiidhiyayaal dabacsan. Ka fikir isticmaalka filim daaqadahaaga ama rakibaadda quraarado la baceeyey si aad uga hortagto dhaawacyo ka yimaada quraaradaha jajaba.



Macluumaad dheeraad ah ee mashaariicdan, ama waxyaalo kale ood samayn karto si aad u ilaaliso gurigaaga iyo qoyskaaga, la xidhiidh waaxda bilayska deegaankaaga ama xafiiska maamulka gurmada.

Qorshee waxa aad samayni hadday tahay inaad qaxdo.

Dooro laba meelood ood qoyskaaga kula kulanto. Midi waa inuu noqdaa debadda dhaw ee gurigaaga waa intaa ooy dhacdaa xaalad gurmada lama filaan ah, sida dabka. Ka kale waa inuu noqdaa debadda jaarkaaga, waa intaa ood kusoo noqon waydaa guriga ama lagu waydiistaa inaad qaxdo.

Go'aanso halka aad tagi doonto iyo dariiqa aad qaadi si aad halkaas u tagto. Waxaad dooran kartaa inaad tagto huteel, asxaab ama qoys la joogis meel badbaado leh, ama tagi kartaa gabbaad. Ku qabo tabobarrada qixista guriga. Ku tabobarta uga bixista guriga si dhakhso ah, iyo baabuur ku wadidda dariiqa qaxa loo qorsheeyey. Inta badan eed tabobarato, waa inta badan eed kalsooni dareemi doonto haddaad si dhab ah u qaxdo.

Qorshe u sii deg rabbaayaddaada. Arrimo caafimaad dartood, rabbaayadda lagama oggola gabbaadyada Laanqayrta Cas. Hayso liis tilifoonada huteelada rabbaayadda laga oggol yahay iyo gabbaadyada xayawaanka kuwaasoo ku dherersan dariiqaaga qixista waa intaayoo gabbaadka rabbaayadda la waayaaye. La xidhiidh bulshada daryeelista deegaankaaga ama gabbaadka xayawaanka si aad u waydiiso haddii gabbaadyada gurmada rabbaayadda la furi doona masiibada.